

RAINIER BEACH: A BEAUTIFUL SAFE PLACE FOR YOUTH (MEEL AMMAAN AH QURXOON OO LOOGU TALOGALAY DHALLINTA)

SOO KOOBIDDA MASHRUUCA IYO QIIMEYNTA

Charlotte Gill, Zoe Vitter, iyo David Weisburd

Center for Evidence-Based Crime Policy (Xarunta Siyaasadda dambiga Ku Saleysan Caddeynta), Department of Criminology (Waaxda Dambiyada), Law & Society (Sharciga iyo Bulshada), George Mason University (Jaamacadda George Mason)

MAXAY TAHAY RAINIER BEACH: A BEAUTIFUL SAFE PLACE FOR YOUTH?

Rainier Beach: A Beautiful Safe Place for Youth (ABSPY) waa qorshe cusub, ku saleysan goobta ay hogaamiso bulshada, oo looga hortago dagaalka. Ujeedada barnaamijka waa in la yareeyo dhibka iyo dambiyada loo geysto dhallinta xaafadda Rainier Beach. Barnaamijka waxaa loo magacaabay aragtida ay bulshada Rainier Beach u dajisay Neighborhood Pan Update (Casriyeynta Qorshaha Xaafadda), taasoo Rainier Beach ka dhigta Beautiful Safe Place (Meel Ammaan ah oo Qurxoon). ABSPY waxay ka socotaa shan koox yaryar oo ka tirsan blogyada jidadka xaafadda - "meelaha kulul" - halkaas ay ka dhaceen bar ka bar dhamaan dhacdooyinka dambiyada dhallinta Rainier Beach sannadkii 2012. Shanta meel kulul waa Rose Street, Rainier iyo Henderson, Rainier Beach Light Rail Station (Saldhigga Treenka Fudud Rainier Beach), Lake Washington, iyo Safe Way.

TAARIKHDA MASHRUUCA

ABSPY waxay ku saleysan tahay tiro cilmi baaris la sameyay, sida midka ay soo saareen David Weisburd iyo asxaabtiisa, oo muujiya in ku dhawaad bar ka bar dhamaan dambiyada ka dhaca magaalooyinka ka soo jeedaan tiro aad u yar - caadi ahaan ku dhawaad boqolkiiba 5 - blogyada jidka. Dambiyada ku lugta leh dhallinta waxay xattaa aad ugu badan yahiiin in ay ka yimaadaan tiro yar goobaha maxaa yeelay dhallinta waxay caadi ahaan inta badan waqtigooda geliyaan meelo gaar ah sida dugsiyada, beeraha, iyo meelo kale ay dadweynaha tagaan, sidaas darteed dambiyada dhallinta waxay aad ugu badan yahiiin meelaha noocaan. Cilmi baarista waxay muujisay in dadaalka boliiska in dambiyada ka dhaca meelaha kulul lagu yareeyo cadaadis iyo soo-xerid wax ka qabato yareynta dambiyada. Hase ahaatee, xeritaanka iyo maxkamadeynta waxay kordhin kartaa fursadda dib u gafidda dhallinta ku jirta halista sare. Bacdamaa tani jirto, ABSPY waxay xoogga saartaa xiiladaha xerid la'aanta si loo yareeyo dambiga, sida dhismaha hoggaaminta iyo awoodda bulshada si loo kaalmeeyo xallinta dhibaatooyinka iyo si wax looga qabto halista qodobada jawiga xagga dambiga si loo horumariyo ammaanka bulshada.

HOGGAAMINTA MASHRUUCA IYO TAAGEERADA

ABSPY waxay ka dhallatay deeq \$1 milyan oo sannadkii 2012 laga helay Byrne Criminal Justice Innovation Program (Barnaamijka Cusboneysiinta Caddaaladda Dambiga), qorshaha U.S. Department of Justice's Bureau of Justice Assistance (Xafiiska Kaalmada Cadaaladda Waaxda Cadaaladda Mareykanka). Byrne Criminal Justice Innovation Program wuxuu taageeraa iskaashiga ka dhexeeyo magaalooyinka, bulshada, iyo cilmi baareyaasha si loo horumariyo dadaalka xallinta dhibaataada ku dhisan xogta, ku saleysan goobta, iyo hoggaaminta bulshada. ABSPY waxaa la talliya Koox Dhexe oo ka kooban wakiilo ka socdo Magaalada Seattle, Seattle Neighborhood Group (Kooxda Xaafadda Seattle), Seattle Police Department (Waaxda Boliiska Seattle), Boys and Girls Club of King County (Naadiga Wiilasha iyo Gabdhaha Dagmada King), iyo Rainier Beach Action Coalition (Isbaheysiga Waxqabadka Rainier Beach). Hase ahaatee, waxa si gaar ah u tilmaama ABSPY waxay tahay in bulshada Rainier Beach nafteeda u horseeday soo saarka horumarinta xiiladaha ku dhisan caddeynta si wax looga qabto waxyaabaha ka dambeeyo dhallinta xaafadda.

XALLINTA DHIBATOYINKA BULSHADA HOGGAAMISO

Wadnaha habka ABSPY waxay ahayd horumarinta Community Task Force (CTF, Xoogga Hawsha Bulshada), koox ka kooban in ka badan 100 xubnaha bulshada oo ka fakara kala duwanaanta ka jirta xaafadda Rainier Beach. Kaddib marka la kaashaday taageerada City of Seattle's Public Outreach and Engagement Liaisons (Gaarsiinta iyo Xariirinta Dadweynaha Magaalada Seattle), kooxdaan waxaa si toos ah looga qoray shanta meel kulul, waxayna ka kooban yahiin dadka daggan, milkiileyaasha ganacsiga, shaqaalaha, ardayda, iyo dad kale oo xariir la leh goobahaas. ABSPY Core Team (Kooxda Dhexe ABSPY) waxay la shaqeysay Community Anti-Drug Coalitions of America (CADCA, Iskaashiga Ka Soo Horjeedka Mukhaadaraadka Bulshada Mareykanka) si loo soo saaro kullanka tababarka halka maalin bisha Oktoobar 2013 halkaas ay CTF ku baratay Nidaamka bulshada ee qaabdhismeedka xalinta dhibaataada ee ka imaanayo goobta caafimaadka bulshada si loo aqoonsado xalalka dambiga dhibaatooyinka iyo qodobada halista, iyo xalka, lana isticmaalo xogta deegaanka, waayaha bulshada, iyo caddeynta cilmi baarista. Tababarka waxaa ku xigay taxane ka kooban lex kullanka halkaas oo CTF loo qeybiyay shan koox - hal koox meel kasta oo kulul - kaddibna soo saartay tiro faragelin oo loogu talagalay xaaladaha u gaarka ah mid kasta meelaha kulul. Faragelintaan waxay xoogga saartay afar aagag oo muhiim ah:

1. kordhinta kormeerka iyo siinta dhismaha loogu talagalay dhallinta
2. badelayo muuqaalka deegaanka
3. badelayo xeerarka iyo sharciyada
4. dhismaha waxtarka wadajirka ("waxay qaadataa tuulo").

Kaddib marka la adeegsaday kullamada CTF, xubnaha bulshada waxaa laga codsaday in ay "sheegaan sheekada" dambiyada dhallinta goob kasta iyaga oo sharaxa xariirka ka dhexeeyo dhibaatooyinka iyo waxay aqoonsadeen qodobada halista ee ka jira goob kasta, la tixgeliyo natiijadaha la jecel yahay, la soo jeediyay xal ku dhisan caddeynta cilmi baarista, iyo qiimeynta suurtoogalka ah ee hab kasta. Marka kullamada tababarka dhamaadaan, faragelinta la soo jeediyay waxaa loo soo bandhigay bulshada Rainier Beach, munaasabadda lagu magacaabo "The Gathering" (Isu Imaashada).

FARAGELINTA:

Shaqada Core Team iyo CTF waxay u horseeday horumarinta fullinta qorsaha ee sida tooska ah wax uga qabta qodobada halista dambiyada dhallinta, laga aqoonsaday shanta meel kulul kuna dhisan aqoonta magaalada iyo iskaashatada bulshada. Faragelin kasta oo ku jirta qorshaha waxay xoogga saartay mid ama ka badan afarta meel xoogga la saaro ee kor lagu sharaxay, lagu dhamaystiray kuna dhisan faragelinta kale, waxaana loo sameeyay in laga fulliyo qaar ka mid ah ama dhamaan meelaha kulul, taasoo ku xeran xaaladaha qaar ee ka jira goob kasta.

Inta badan faragelinta la soo jeediyay waxay xoogga saareen ka-qeybgelinta xubnaha bulshada Rainier Beach si loo jebiyo waxyaabaha ku dadban ee ka dhexeeyo xaafadaha loona dhiso xariirka iyo awoodda xallinta-dhibaataada. Fikradahaan waxay ka yimaadeen natiijadaha ka soo baxay CTF in qaar ka mid ah xubnaha bulshada ka cabsadeen in ay xariir yeeshaan, iyo gaar ahaan in ay la yeeshaan dhallinta. Laga bilaabo kuleylaha 2014, tiro ka mid ah munaasabaddaha Corner Greeter ayaa lagu qabtay bulshada, halkaas ay saldhigyada ka bixiyeen cabbitaan iyo farxad laga abaabulay meelaha kulul si looga qeybgeliyo bulshada loona "kiciyo" meelaha horay loo haystay in aysan ammaan ahayn. Waxaa kaloo bulshada lagu qabtay tiro ka kooban hawlo iyo munaasabado muddada mashruuca socday, kuwaasoo inta badan ay qorsheeyeen dhallinta kaddib marka iskuduwid laga helay ururada bulshada aasaasiga sida Rainier Beach Action Coalition (Isbaheysiga Waxqabadka Rainier Beach). Ujeedada hawlahaan ka-qeybgelinta xaafadda iyo dhallinta waxay ahayd in lagu yareeyo dambiga marka "dib loo sumadeeyo" meelaha kulul lagana dhigo meelo wanaagsan lana horumariyo maslaxadda dhallinta ku qabaan bulshada.

Ganacsiyada yaryar, ee deegaanka laga leeyahay, waxay bartame u yahiin Rainier Beach. Faragelin kale ayaa xoogga saartay **ka-qeybgelinta ganacsiga**. Iskuduwidda Seattle Neighborhood Group (Kooxda Xaafadda Seattle) iyo taageerada Rainier Beach Merchants Association (Ururka Tujaarta Rainier Beach) kaddib, Seattle Police Department iyo ururada bulshada deegaanka iyo ururada horumarinta dhaqaalaha, ujeedada ka-qeybgelinta ganacsiga waxay ahayd in la barto arrimaha hor taagan ganacsiga deegaanka, la dhiso xariirka ka dhexeeyo ganacsiga iyo boliiska, iyo la kordhiyo awoodda milkiileyaasha ku leeyahiin ganacsiga si

looga hortago loona soo sheego dambiga. Fargelinta iyo ilaha **Crime Prevention Through Environmental Design (CPTED, Ka Hortagga Dambiga Lagu Gaaro Handasada Deegaanka)** waxaa la siiyay ganacsatada si loo hagaajiyo handasada, qorshaha, iyo maamulka goobta.

Xerada Rainier Beach ee ku taal Rainier iyo Hendersen, halkaas ay ku yaalaan afar dugsi, waa meel ay isugu timaado bulshada. ABSPY waxay isu keentay qeybaha daneeya in ay sameyaan **Rainier Beach Campus Safety Team (Kooxda Ammaanka Xerada Rainier Beach)**, halkaas ay Magaalada iyo Seattle Public Schools (Dugsiyada Dadweynaha Seattle) la shaqeyeen iskaashatada bulshada si loo soo saaro fikradaha socda si loo horumariyo ammaanka, sida isku xijinta waqtiyada laga sii daayo dugisga si loo hubiyo in dhallin badan ay isugu yimaadaaan meelaha kulul. Ujeedada ugu muhiimsan faraglinta Rainier Beach Campus (Xerada Rainier Beach) waxay ahayd barnaamijka **Safe Passage (Nabad Gelyada)**, kaasoo ay hoggaamiyaan Boys and Girls Club (Naadiga Wiilasha iyo Gabdhaha). Kooxda Safe Passage waxay ilaalin, kormeer, iyo ka-qeybgelin siisaa dhallinta marka ay ka tagaan dugisga. Iyaga oo labbisan shaarar baluug oo iftiima kuna daabacan "Be Safe" (Ilaali Ammaanka), kooxda waxay u dhaqmeen sida qaangaar laga helo taageero la arki karo iyo ku dayasho..

NATIJDADAHA QIIMEYNTA

Center for Evidence-Based Crime Policy (Xarunta Siyaasadda Dambiyada Ku Dhisan Caddeynta) ee ka jirta George Mason University (Jaamacadda George Mason) waxay bixisay cilmi baaris iyo taageerada qiimeynta inta mashruuca socday. Si loo qiimeeyo waxqabadka barnaamijka, waxaan la soconay wicitaanka adeegga boliiska kaddibna waxaan soo sheegnay dhacdooyinka dambiga ka dhaca shanta meel kulul laga bilaabo Sateembar 2011 ilaa Agoosto 2016. Meel kasta oo kulul waxaan la xariiray iyo barbar dhignay meel kale oo kulul - goob kale oo la mid ah Seattle Police Department's South Precinct (Xaafadda Koofur Waaxda Boliiska Seattle) - kaddibna qiimeeyay dambiyada ka jira xaafadda Rainier Beach, guud ahaan la barbar dhigay sasaanka ka jira South Precinct. Waxaan sidoo kale labo wareysi la yeelanay meelaha kulul iyo meelaha la barbar dhigo - mid waxaa la fulliyay kuleylaha 2014 ka hor inta faragelinta aysan bilaabanin iyo mid ku xiga kuleylaha 2016 -.

Natiijadeena waxay tuseysaa in:

- Boosaska kulul yaraadeen "kuleel" waqti kadib.
- Dambiga South Precinct hoos ayuu oga dhacay guud ahaan, iyo qiimo ka badan inta ka dhiman caasimada.
- Boosaska kulul waxay arkeen hoos u dhac weyn ee rabshada halista ah in ka badan guud ahaan xaafada ama South Precinct.
- Qaar ka mid ah boosaska kulul waxay u soo waceen adeegyo, howsha booliska, oo soo wargeliyay dhacdooyinka kordhay. Tani muhiim uma ahan sababta walaaca—waxay tilmaami kartaa in ABSPY buuxisay hadafkeeda ee ka qeybgalka bulshada korodhay oo aamin booliska.
- Tirada dadka lagu sahmiyay meelaha kulul ee ABSPY ee aaminsan in dambiga hoos u dhacay sannadkii la soo dhaafay ee sahanka 2016.
- ABSPY waxay la xiriirtaa dhexdhexaad ah laakin balan qaadayo hormarinada aragtida dadka ee la ogolyahay iyo nidaamdarada, iyo dareenkooda ee booliska.

Iyada oo aanan helin tirikoob ahaan hoos u dhaca ee dambiga guud ahaan, ogow in fullin buuxdo ee waxqabadyada aysan bilaaban illaa 2016 sabab la xiriirto dhibaataada bilaabida hal abuurka, xeeladaha bulshada ku saleysan. Waxay qaadan kartaa waqti badan si loo arko saameynta hoos u dhaca dambiga. Tusaale ahaan, waxay qaadataa sadex sanno ee Bulshooyinka Daryeelo, qaabdhismeedka xalinta dhibaataada bulshada cadeynta aad loo yaqaan ku saleysan, si ay si wey ugu muujiso tirikoobka natiijooyinka qiimeynta.

ADKEYNTA DADAALKA

Baddalaadda goobaha iyo bulshadaha waa dadaalka muddada dheer. Natiijadahena ka soo baxay qiimeynta waxay na geliyeen rajo, gaar ahaan heerka ka-qeybgelinta bulshada habka xallinta-dhibaataada iyo waqtiga fullinta iyo nidaamka laga helay ee ku saabsan iskuduwidda hawlaha faragelinta ABSPY lala yeeshay dhinacyada maslaxadda ku qaba xaafadaha kale, sida bulshada

ganacsiga iyo dugsiyada. Waxaa jirta shaqo badan oo loo baahan yahay in la sameeyo si loo habsado in Rainier Beach ku sii socoto in ay ahaato A Beautiful Safe Place for Youth. Dadaalka in laga qeybgeliyo bulshada, sida dadaalka Corner Greeters, ka-qeybgelinta ganacsiga, iyo Safe Passage waxay weli ka socdaan goobaha kulul iyo dhowr hagaajin balaaran oo lagu sameyay qaababka jidka CPTED laguna mealgeliyay ilaha dadweynaha waxay dhici doonaan horaanta 2017. ABSPY waxay ku guuleysatay in ay dhiso awoodda isbaddalka wanaagsan, kaddibna, natiijo ahaan, sannadkii 2015 waxaa isu yimid bulshada iyo Core Team kuwaasoo ku guuleystay in ay taageero ka helaan Magaalada Seattle sannadkii 2016. Caasimada waxaa hadeer si buuxdo u maalgeliyay ABPSY illaa 2018. ABSPY waxay kaloo awood u heshay in ay sii waddo deeqda alaabta iyo deeqda laga helo ururada ku lugta leh. Iyo guushena hore waxay furtay fursado cusub oo la xariira maal gelinta iyo cilmi baarista, sida deeq cusub \$3.8 malyan oo laga helay National Institute of Justice (Machadka Cadaaladda Qaranka) si loo xoojiyo Positive Behavioral Interventions and Supports (Faragelinta Dabeecadda Wanaagsan iyo Taageerada) iyo cadaaladda dhexdhexaadinta ka jirta xerada Rainier Beach iyo bulshada balaaran. Waxaan kaloo la shaqeynay Seattle Police Department si aan u dhisno awoodooda lagu aqoonsado goobaha kulul iyo la shaqeynta bulshada si wax looga qabto dhibaatooyinka. ABSPY waxay ku socotaa in ay si wanaagsan xididdo ugu yeelato bulshada Rainier Beach iyo kooxda waxay la socon doontaa natiijadaha iyo manaafacaadka ka soo baxa, mustaqbalka.